



## TILMAAMAHA ISTICMAALAHA EE KA QAYBGALKA KULANNADA FIIDYOWGA AH EE WHEREBY


### KU SAABSAN ADEEGA

Wadahadalka fiidyowga ah waxa si toos ah looga samaynayaa baadhaha internetkaaga, oo ah meesha aad caadi ahaan ka akhrisato wargeysyada iyo internetka.


Waxannu ku talinaynaa inaad isticmaasho baadhaha Google Chrome  ama Safari  haddii aad haysato Mac ama iPhone. (Baadhaha Internet Explorer ma shaqaynayo, laakiin Microsoft Edge iyo Firefox ayaa shaqayn kara)

### QAABKEE LOO ISTICMAALAA ADEEGGA

1. Waxaad heshay balan uu la socdo cinwaanka kulanka fiidyowga. Taabo cinwaanka aad heshay.
2. Weydiiso inaad soo gasho si aad u daartid kamarada iyo mikirofoonka.



3. Baadhaha internetka u ogolow inuu furo kamarada iyo mikirifoonka.




Marka aad ogolaato isticmaalka codka iyo kamarada waxaad samayn kartaa tijaabin.

4. Qor magacaaga (Fornavnet) hore oo taabo «Fortsett».



5. Garaac si aad u gasho kulanka.



6. Marka daweyuhu yahay diyaar ayaad soo geli kartaa kulanka.

7. Doorashooyin gaar ah ayaa kuu sahlaya inaad maamusho kamarada iyo codka marka aad ku jirto kulanka:

Dami ama daar kamarada



Ka bax kulanka

Dami ama daar mikirofoonka

Daaweeyaha oo keliya ayaa cid la wadaagi kara shaashada

Taabo halkan si aad u aragto ka qaybgalayaasha kulanka